

## Heerka Vitamin D oo hoosaysa

Vitamin D yaridu waa wax ka jira Australia. Waxaa aad loogu yaqaanaa dadka ku nool Victoria iyo Tasmania (gobolada koonfureed) iyo dadka madoow. Waxaa laga yaabaa in Vitamin D-da oo hoosaysa aysan jirin calaamado la socda oo lagu garto, ama aysan keenin saamayn macno leh.

**Vitamin D badankeeda waxaa lagu sameeyaa maqaarka marka iftiinka qoraxdu ku dhacdo.** Way adagtahay in Vitamin D inagu filan laga helo cuntada oo kaliya. Cuntooyin aan badnayn ayaa laga helaa vitamin D sida (malaayga, ukunta). Margarine iyo caanaha qaarkood waxay leeyihiin vitamin D lagu daray, laakiin dadka badankiisu waxay ka helaan oo kaliya 10 - 25% oo vitamin D-dooda ah cuntada.

**Vitamin D waxay lagama maarmaan u tahay caafimaadka lafaha iyo muruqyada ee dhamaan da'aha kala duwan ee dadka.** Vitamin D-da oo hoosaysa waxaa ka dhalan kara:

- Lafo iyo muruqyo xanuun
- Lafahoo macdan yaraada (lafahoo khafiif noqda) taasoo caruurta ku keenta *rickets* oo ah lafahoo qaloocsama, dadka waaweyna ku keenta *osteomalacia*.

Waxaa jira cadaymo tusaya in vitamin D yarida lagu xiriiriyo xaalado caafimaad xumo sida: Kansarka mindhicirada, wadno xanuun, dhiig kar, istroog, dhibaatooyin la xiriira xaga difaaca jirka iyo cudurada saameeya qaab difaaca jirka (sida kaadi sonkorowga).

### Dadkay u badantahay inay ku dhacdo vitamin D yari

- **Dadka madoow.** Midabeeyaha maqaarka ku jira oo la dhaho (melanin) ayaa u shaqeeyaa sidii qorax difaace dabiici ah, kaasoo dheereeya wakhtiga loo baahan yahay in lagu sameeyo vitamin D.
- **Dadka qoraxda aan u bixin ama wax yar uun qorax hela.** Dadka guryaha ku xaraysan ama qaba dhar jirkooda daboola
- **Caruurta la naas nuujiyo (ee qaba waxyalo kale oo u gogol-xaari kara vitamin D yari).** Caanaha naasku waa cuntada ugu fiican ilmaha yar, laakiin caanaha naasku ma laha vitamin D badan. Caruurta yar ee naas nuuga ahi waxay kaydka ugu horeeya ee vitamin D-da ah ka helaan hooyooyinkood; sidaas daraadeed waxay khatar ugu jiraan inay ku dhacdo vitamin D yari hadii vitamin D-da hooyooyinkood ay hoosaysay ama ay leeyihiin midab madoow.

### Baarida Vitamin D iyo daaweynteeda

- **Dhamaan dadkay u badan tahay inay ku dhacdo vitamin D yari waa in dhakhtarkoodu uu dhiiga ka baaro heerka vitamin D-da**
- **Dadka vitamin D-doodu ay hoosayso waa in la siiyo daawooyin si heerka vitamin D-doodu ay ugu noqoto heerka caadiga ah (caruurta waa inay ka sarayso 50 nmol/L ; dadka waaweyn waa inay ka saraysor 75 nmol/L)**
- **Daawooyinka vitamin D waxay ahaan karaan kuwo maalin walba la qaato ama kuwo bishiiba mar la qaato ama si joogta ah aan loo**

**qaadanin.** Daawooyinka vitamin D loo qaato ee bishiiba mar la qaato waxay hada yihin kuwo aad loo helo. Fadlan u sheeg dhakhtarkaaga hadaad wax vitamin D ah **qaadatid.** Vitamin D farabadan oo la qaatana dhibaatooyin baa ka imaan kara. Vitamin D badan lama qaadan karo xiliga uurka.

- **Dadka vitamin D-doodu ay hoosayso waxay kaloo u baahan yihin inay cuntadooda ku jirto kaalshiyam ku filan.** Dadka badankiisu waa inay 2-3 jeer wax caano laga sameeyay maalintii qaataan( wax caano lag sameeyay wuxuu ahaan karaa: galaas caano ah, hal yoogort ama jeex jiis ah).
- **Heerka vitamin D-da oo hoosaysa waa dhibaato wakhti dheer qaadata.** Marka la daaweeyo vitamin D-da hoosaysa waa in culayska la saaro sidii vitamin D-du u joogi lahayd heer caadi ah. Dadkay u badan tahay inay saamayso vitamin D yari waa in heerka vitamin D-dooda la baaro sanad walba, waxaana suurtagal ah in noloshoodoo dhan ay tahay inay qaataan vitamin D daawo ah.

### **Qoraxaysiga iyo vitamin D**

Inta badan Australiyaanka leh midabka cad waxay ka helaan vitamin D ku filan qoraxda iyagoo ku jira hawl maalmeedkooda caadiga ah ee banaanka ay ugu baxaan, **xitaa** haday marsadaan kareemada qoraxda lagaga gaashaanto. Dadka midabka cad waxay khatar ugu jiraan kansarka maqaarka sidaas daraadeed waxaa **lagu boorinayaa** inay qoraxda **ka gaashaantaan.**

Dadka maqaarka madoow si ay u helaan vitamin D ku filan waxay u baahan yihin wakhti dheer inay qoraxda joogaan ( qiyaastii 3-6 jeer in ka badan intay u baahan yihin dadka cadaanka ah). Iyadoo midabeeyaha ku jira maqaarka dadka madoow **uu** ka difaaco kansarka maqaarka ayay hadan muhiim tahay inay xidhaan koofiyado iyo ukiyalaha qoraxda la ga qaato.

Victoria	Dadka midabka cad	Dadka midabka madoow
<b>Xiliga bilaha kulul</b> September ilaa April celceliska heerka UV-ga $\geq 3$	Dhawr daqiqo oo qoraxda la isku dhigo inta ka horaysa 10-ka subaxnimo ama 3 -da galabnimo maalmaha asbuuca badankood. Qoraxdaas oo ku dhacda wejiga iyo gacmaha waxay siini vitamin D ku filan.	30 - 60 daqiqo oo qoraxdu ku dhacdo wajiga iyo gacmaha 10-ka subaxnimo ka hor ama 3 -da galabnimo ka dib waa in laga helo vitamin D ku filan
	Qoraxda in laga gaashaanto waa loo baahan yahay (Kareemyada laga marsado qoraxda, koofiyad, okiyaale)	Looma baahna kareemyada laga marsado qoraxda. Koofiyad iyo okiyaalaha qoraxda waa loo baahan yahay.

<b>Xiliga bilaha qaboow</b> May ilaa August celceliska heerka UV-ga < 3	2 - 3 saacadood asbuucii ay qoraxdu ku dhacdo wajiga iyo gacmaha waa in laga helo vitamin D ku filan	Waxaa loo baahan yahay todobaadkii ilaa 18 saacadood ay qoraxdu ku dhacdo wajiga iyo gacmaha. Dadka badankiisu ma joogaan wakhtigaa dheer banaanka xiliga qaboobaha oo waxay u baahan yihiin daawooyin ka kaba vitamin D-da.
	Looma baahna in qoraxda laga gaashanto inaad ku noosahay dhul buuralay ah ama meelo ilysaka qoraxda soo celiya sida barafka/biyaha	Looma baahna in qoraxda laga gaashanto inaad ku noosahay dhul buuralay ah ama meelo ilysaka qoraxda soo celiya sida barafka/biyaha